# Qoysaska Isu-doodeyaal ahaan: U-doodidda Ardaygayga Luuqadaha Badan Ku Hadla

Qoys luuqado badan ku hadla ahaan, u-doodidda ilmahaagu waxay ka dhigan tahay inaad xaq u leedahay in lagu wargeliyo, lagaa qaybgeliyo, oo laguu ixtiraamo sidii shuraako siman oo ka wada shaqaynaya horumarka luuqadda ilmahaaga, waxbarashadiisa, iyo dhinacyada kale ee waxbarashadiisa. Kheyraadkani wuxuu bixinayaa mowduucyo iyo su'aalo tusaale ah oo waalidiinta iyo qoysasku ay weydiin karaan barayaasha waxaana loogu talagalay in lagu xoojiyo dadaalkooda u-doodidda. Waxaa lagu sameeyay talooyin ka yimid qoysas adiga oo kale ah oo wadaagay waxyaabaha mudnaanta u leh marka ay timaado u-doodidda carruurtooda. Waad dooran kartaa mowduucyada iyo su'aalaha adiga kugu habboon waadna ku dari kartaa su'aalo kale haddii loo baahdo.

## Kobcinta Wada-xiriirka laba geesoodka ah, Helitaanka Luuqadda iyo Ka-qaybqaadashada

Waxaad xaq u leedahay wada-xiriir cad, joogto ah, laba geesood ah, oo la heli karo oo idin dhex mara adiga iyo iskuulka ilmahaaga. Waxaa kale oo muhiim ah inaad dareento in lagu soo dhoweynayo oo laguu dhan yahay. Qaybtani waxay ku siinaysaa su'aalo aad isticmaasho si aad ugu dooddo wada-xiriirka laba geesoodka ah, adeegyada helitaanka luuqadda, iyo ka-qaybqaadashada iskuullada.

### Wada-xiriirka laba geesoodka ah

1. Ma jiraa qof iskuulka ama degmada ka tirsan oo si toos ah ula shaqeeya qoysaska iyo/ama bulshada? Hadday haa tahay, sideen ula xiriiri karaa?
2. Intee jeer ayaan filan karaa inaan war ka helo macallimiinta ama iskuulka, sideense ula xiriiri karaa marka aan qabo su'aalo ama walaac?
3. Waa kuwee siyaabaha ugu wanaagsan ee aniga iyo iskuulku aan isku weydaarsan karno macluumaadka oo aan u wada xiriiri karno?

### Helitaanka Luuqadda

1. Iskuulka iyo/ama degmadu ma bixiyaan adeegyo turjumaad qoraal iyo/ama mid afka ah?
2. Sideen u codsan karaa turjumaan marka aan u baahdo inaan la hadlo macallinka ama aan la kulmo qof iskuulka jooga?

### Ka-qaybqaadashada

1. Ma jiraan wax muhiim ah oo ay tahay inaan ka ogaado sida ay wax uga shaqeeyaan iskuulka?
2. Maxaa fursado ah oo ii furan si aan si firfircoon ugula shaqeeyo iskuulka iyo/ama shuraakada bulshada? (Tusaale ahaan, ka caawinta qorsheynta munaasabadaha iyo waxqabadyada, ka qaybgalka go'aan gaarista, ama ku biirista dadaallada horumarinta iskuulka.)
3. Waa maxay fursadaha u furan qoysaska si ay ula wadaagaan ra'yigooda, ula shaqeeyaan shaqaalaha iskuulka,


© 2025 Board of Regents of the University of Wisconsin System, on behalf of WIDA

ama ula xiriiraan qoysaska kale ee iskuulka iyo bulshada dhexdeeda?

## Taageeridda Waxbarashada, Horumarka Tacliimeed iyo Ladnaanta Daryeelka leh ee Ardayga

Waxaad xaq u leedahay inaad fahamto sida ilmahaaga loogu taageerayo iskuulka, fasalka dhexdiisa iyo dibaddiisaba. Qaybtani waxay ku siinaysaa su'aalo aad isticmaasho si aad ugu dooddo yoolalka luuqadda iyo waxbarashada ilmahaaga iyo jawiga nabdoon, loo dhan yahay oo arday kastaa uu ku horumari karo dhinaca bulshada, shucuurta, iyo tacliinta.

### Taageerada iyo Fursadaha Tacliinta

1. Yaan u tagi karaa haddii aan su'aalo ka qabo manhajka iskuulka ama fasalka, wax-baridda, barnaamijyada luuqadda, ama meelaynta fasalka?
2. Yaan u tagi karaa haddii aan su'aalo ka qabo ama aan u baahanahay taageero ku saabsan horumarka tacliimeed ee ilmahaaga, horumarka luuqadda, ama walaacyada fasalka?
3. Maxaa fursado ah oo ii furan si aan ula shaqeeyo iskuulka oo aan u taageero waxbarashada ilmahayga ee guriga iyo fasalka dhexdiisa?
4. Xaggeen ka heli karaa macluumaad ku saabsan kheyraadka tacliinta, taageerada dheeraadka ah, ama fursadaha sida deeqaha waxbarasho iyo u diyaarinta kulliyadda ama xirfadda ee ilmahayga?

### Ladnaanta iyo Adeegyada Taageerada

1. Sidee buu iskuulku u abuuraa jawi soo dhaweyn leh oo loogu talagalay ardayda luuqadaha badan ku hadasha oo uga caawiyaa inay dareemaan nabadgelyo, ka mid noqosho, iyo taageero xagga bulshada iyo shucuurta ah?
2. Sidee buu iskuulku wax uga qabtaa cagajugleynta iyo dhibaataynta ka dhex dhacda bulshada iskuulka?
3. Sidee buu iskuulku u taageeraa ardayda la kulma diiqada guriga?
4. Sidee buu iskuulku ula shaqeeyaa ururada bulshada si uu u taageero ardayda luuqadaha badan ku hadasha iyo qoysaskooda?
5. Ma jiraan adeegyo caafimaadka dhimirka ah oo ay ardaydu heli karaan iskuulka ama bulshada dhexdeeda, sideese lagu heli karaa?
6. Sideen wax uga ogaan karaa waxqabadyada manhajka ka baxsan ee u furan ilmahayga?

Su'aalo kale ma qabtaa? Meesha hoose u isticmaal si aad ugu darto su'aalaha kale ee aad jeclaan lahayd inaad weydiiso barayaasha.


© 2025 Board of Regents of the University of Wisconsin System, on behalf of WIDA